



DENVER  
PUBLIC  
SCHOOLS  
Discover a World of Opportunity™

## Tilmaamaha Waalidka ee Qiimaynada

### TIJAABADA DHANKA AKHRISKA (RI) oo loo yaqaano Scholastic Reading Inventory (SRI, Imtaxaanka Fahanka Akhriska)

Qiimeynta waxay siisaa warbixin qimo leh ardayda, waaladiinta iyo macalimiinta oo kusaabsan in ardaydu ay gaareen heerka fasalka laga rabo iyo heerarka udagsan maadada ayna kusocdaan wadadii qalin jabinta oo udiyaarsan qarniga 21 aad. Natijjooyinkaan qiimaynta waxaa loogu talagalay inay hal cadayn unoqdaan hormarka aqooneed ee cunugaaga.



#### MAXAY TAHAY QIIMAYNTAAN?

SRI waa imtaxaan lagu qaado kumbuyutarka kaasoo cabiraaya aqoonta akhriska aasaasiga ah iyo fahanka akhriska labadaba. SRI wuxuu dabagal kusameeyaa xirfadaha akhriska lagasoo bilaabo erayada koobaad ee araga ilaa qoraalada heerka kuleejka iyo barashada xirfada. Ayagoo adeegsanaaya Naqshada Akhriska ee Lexile, SRI waxay kacaawisaa macalimiinta inay qiyaasaan awooda ardayga ee buuxinta aqoonta heerka fasalka iyo udiyaar ahaanshaha kuleejka iyo xirfad barashada, inay badalaan qaababka casharada, inay qorsheeyaan caawimaadaha gaarka ah iyo inay muujiyaan hufnaan ku aadan maclummaadka lagu dhaqmi karo.



#### XAGEE AYAA CUNUGAYGA IMTAXAANKA LOOGA QAADAYAA?

SRI waxaa laga qaadaa ardayda kujira fasalada 6-12 kuwaasoo qayb ka ah READ Act Cohort (Maadooyinka Sharciga READ). Imtaxaanada Sharciga READ waxaa lasameeyaa lix asbuuc xiliyada dayrta iyo gu'ga.

#### Dhinacyada la Imtixaamayo

Xiliyada imtaxaanku waa waqtii cayiman xiligaasoo ardaygaagu imtaxaan gali karo maalmaha qaar halka maalmaha qaarna casharo caadi ah lasiinaayo. Ardayda imtaxaanka magalaan dhamaan mudada loo asteeey imtaxaanku inuu socdo. Si aad uhesho maclummaadka maalmaha gaarka ah ee ardaygaagu imtaxaanka galaayo, fadlan waydii macalinka cunugaaga.

Cunugaaga waxaa imtaxaanka laga qaadayaa halmar xili imtaxaaneed kasta, waxaana kaliya imtaxaan laga qaadayaa maalmo gaar ah si waafaqsan fasalkiisa, lamana imtaxaanaayo dhamaan mudada imtaxaanka. Imtaxaan kasta wuxuu qaadanayaa 20-40 daqiqo si waafaqsan fasalkooda iyo heerkooda akhriska. SRI waxaa laqaadi karaa dhamaan mudada sanad dugsiyeedu socodo si loola socdo hormarka ardayga. Fadlan waydii macalinka cunugaaga si aad u ogaato jadwalka imtaxaanka cunugaaga.



#### WAA MAXAY BUUNDOOYINKA CUNUGAYGU HELI DOONO?

Cunugaagu wuxuu helayaa buundada imtaxaanka Lexile ayadoo laga fiirinaayo Fahankiisa Akhriska ee Imtaxaanka Xifdinta Ardayga. Imtaxaanada SRI waxay cabirayaan heerarka fahanka akhriska ee cunugaaga, taasoo usahlaysa macalimiinta inay qiimeeyaa awoodiisa akhriska, inay qorsheeyaan casharada si cabirkaas waafaqsan iyo inay lasocdaan hormarka dhanka akhriska.



#### SIDEE AYAA BUUNDOOYINKAAN LOO ADEEGSANAYAA?

Buudooyinka Lexile ee SRI, oo ay go'aaminayaan gudiyada adaalka heerarka aqoonta luuqada, waxaa loo adeegsadaa in lagu abuuro heerarka akhriska ee dhamaan akhriska fasalka, akhriska kooxda, akhriska madaxa banaan iyo akhriska lahago. Buundooyinka Lexile ee SRI waxaa loo adeegsadaa inay qayb kanoqdaan cadaynta si ay gacan uga gaystaan go'aaminta in cunugaagu wax ku akhrin karo si waafaqsan heerka fasalka ama kahoosaysa.



#### WARBIXIN DHEERAAD AH

Waxaan kugu dhiirigalinaynaa inaad kaqaybgasho waxbarashada cunugaaga. Fadlan haka daahin inaad laxariirto macalinka ardaygaaga si uu kuugu sheego qaababka aad kucaawin karto cunugaaga markuu guriga joogo iyo helitaanka caawimaado dhanka imtaxaanka ah.

Hadaad su'aalo iyo walaacyo kaqabto imtaxaanada, fadlan laxariir dugsiga cunugaaga si toos ah ama wac Adeegyada Deegnaaka Qoyska oo nambarkoodu yahay (720) 423-3054.